

# Ogow Xaqiiqooyinka ku saabsan Gargaarada Dowladdeed

(Xaashidan xaqiiqdu beddel uma noqonayso oo ma aha mid dhanka sharciga ah.)

Waxaa jira xeer federaal oo cusub oo beddelaya sida dadka loo arko inay yihiin kuwa helaya Gargaarada Dowladdeed “Public Charge”. Wuxuu waaxda socdaalka ee federaalka u oggolaadaa in ay fiiriso liiska dheer gargaarada dadweynaha, iyo arrimo badan sida dakhliga qoyska, marka la go'aaminayo haddii qofku u badan yahay in uu noqdo qof mustaqbalka helaya Gargaarada Dowladdeed “Public Charge”. Xeerkanaan cusub ma dhaqan gelayo ilaa laga gaarayo Oktoobar 15, 2019, xeerkuna ma aha mid muddo hore la oggolaaday, sidaa darteed wixii gargaaro ah ee cusub ee lagu daray lama bilaabo doono in loo xisaabiyo dadka ilaa laga gaarayo Oktoobar 15-keeda.

**\*Maclumaad cusub:** Garsoorayaasha federaalka ayaa joojiyay/xannibay xeerka gargaarada dowladdeed ‘public charge’ ee cusub. Ma uusan dhaqan gelin Oktoobar 15, 2019. Ma garanayno goorta xeerka la dhaqan-gelin doono. Ilaha ka fiiri bogga 2 si aad u ogaatid maclumaadka cusub ee hadda jira.

## XEERKA GARGAARADA DOWLADDEED ‘PUBLIC CHARGE’ OO CUSUB MA AHA MID KHUSEEYA QOF KASTA.

Muhaajiriin badan oo u qalmaha gargaarada dadweynaha ayaa laga dhaafay daraasadda lagu sameynayo dadka qaata Gargaarada Dowladdeed “Public Charge test”.

### GUUD AHAAN, XEERKU WUXUU KALIYA KHUSEEYAA:

- Dadka doonaya inay galaan ama dib ugu galaan Maraykanka.
- Dadka dalbanaya in ay u wareegaan oo helaan Sharciga Deganaanshaha Rasmiga ah (LPR ama kaarka deganaanshaha haysta “green card”) ama
- Dadka codsanaya kordhintaa/dib u cusbooneysiinta fiisaha.

Kuwani waa qaar ka mid ah noocyada muhaajiriinta oo ay tahay **IN AYSAN** ka walwalin Gargaarada Dowladdeed “Public Charge”,

### ILAA IYO INTA AYSAN KA BIXIN MARAYKANKA MUDDO KA BADAN 6 BILOOD:

- |  |   |
|--|---|
| <ul style="list-style-type: none"> <li>• Qoxootiga</li> <li>• Magan gelyo doonka</li> <li>• Kuwa isla haddaba ah LPRs (kaarka deganaanshaha haysta “green card”) oo ay ku jiraan kuwa dib u cusbooneysiinaya kaarkooda LPR</li> <li>• Xeerkha Rabshada Ka dhanka ah Haweenka ee dadka iskood si gaar ah codsi u gudbinaya</li> </ul> | <ul style="list-style-type: none"> <li>• Kuwa codsanaya/fiisooyinka T ama U (dadka ka badbaada ka ganacsiga dadka, rabshada qoyska, ama dembiyada kale)</li> <li>• Dhalinyarada muhaajirkha ah ee gaarka ah</li> <li>• Qoysaska xubnaha shaqada ciidan haya, iyo dadka kale.</li> </ul> |
|--|---|

**Xeerkha cusubi waa mid caddeynaya in gargaarada ay helaan kaliya xubnaha qoyska ee muhaajirkha (carruurta ama kuwa kale) AANAN la xisaabinayn in lagu jiro daraasadda lagu sameynayo dadka qaata gargaarada dowladdeed “public charge test” ee muhaajirkha.**

**Xeerkha Gargaarada Dowladdeed ‘Public Charge’ oo cusub KUMA jiraan dhammaan gargaarada dadweynaha.** Haddii aad ka mid tahay muhaajiriinta tirada yar ee ay tahay in ay ka walwalaan Gargaarada Dowladdeed “Public Charge”, xusuusnow in ay jiraan gargaarada qaarkood oo muhiim ah oo aanan la xisaabinayn daraasadda lagu sameynayo dadka qaata Gargaarada Dowladdeed “Public Charge test” (*fiiri shaxanka ku taala dhinaca dambe*).

<p><b>Gargaarada qaarkood oo loo xisaabin <b>karo</b> daraasadda lagu sameynayo dadka qaata Gargaarada Dowladdeed “Public Charge test”:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• <b>SSI (Caymiska Social security-ga ee loogu talagalay dadka aan lahayn taariikhda shaqo oo badan)</b></li> <li>• <b>TANF (Lacagta bishii ee loogu talagalay qoysaska)</b></li> <li>• <b>Daryeelka Muddada Fog ee Medicaid</b></li> <li>• <b>Laga bilaabo Oktoobar 15, 2019.</b> Isbeddeladani ma aysan bilaabmin Oktoobar 15, 2019.* (Fiiri macluumaaadka cusub ee hoosta):           <ul style="list-style-type: none"> <li>» <b>Medicaid aan degdega ahay (OHP) ee loogu talagalay dadka waaweyn ee aan urka lahayn</b></li> <li>» <b>Guryaha Dadweynaha iyo guryaha la kabo ee Section 8</b></li> <li>» <b>SNAP (kaararka cuntada)</b></li> </ul> </li> </ul> <p>Ma aha liis dhammeystiran.</p> <p><b>*Macluumaaad cusub:</b> Garsoorayaasha federaalka ayaa joojiyay/xannibay xeerka gargaarada dowladdeed ‘public charge’ ee cusub. Ma uusan dhaqan gelin Oktoobar 15, 2019. Ma garanayno goorta xeerka la dhaqan-gelin doono. Ilaha ka fiiri qaybta hoose ee boggan si aad ogaatid macluumaaadka cusub ee hadda jira.</p>	<p><b>Gargaarada qaarkood ee aan loo xisaabin <b>karin</b> daraasadda lagu sameynayo dadka qaata Gargaarada Dowladdeed “Public Charge test”:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• <b>Medicaid (OHP) loogu talagalay carruurta ay da'doodu ka yar tahay 21.</b></li> <li>• <b>Medicaid (OHP) loogu talagalay haweenka uurka leh (oo ay ku jiraan 60 maalmood ka dib dhalashada ilmaha</b></li> <li>• <b>Medicaid Degdega ah (CAWEM)</b></li> <li>• <b>Barnaamija Cover All Kids ee Oregon</b></li> <li>• <b>WIC (Gargaarada nafaqada ee loogu talagalay haweenka, dhallaanka iyo carruurta ilaa da'ada 5 jirka)</b></li> <li>• <b>Waxbarashada Gaarka ah</b></li> <li>• <b>Adeegyada caafimaadka dugsiga ku-salaysan ee loogu talagalay carruurta gaartay da'dii dugsiga</b></li> <li>• <b>Hawlgbnimada Social Security-ga</b></li> <li>• <b>Qadada Dugsiga</b></li> <li>• <b>Medicare</b></li> <li>• <b>Caymiska Shaqo la'aanta</b></li> <li>• <b>Cuntada laga gelo goobta cuntada lagu kaydiyo ama xirmooyinka/sanduuqyada cuntada</b></li> </ul> <p>Ma aha liis dhammeystiran.</p>
---	--

## **Waxa aad sameyn kartid:**

Waxaad fahamtaa in daraasadda lagu sameynayo dadka qaata gargaarada dowladdeed “public charge test” ay tahay mid adiga ku khuseysa ka hor inta aadan ka iskaga tegin gargaaro uu qoyskaagu u baahan yahay: Ma jирто hal jawaab sax ah marka ay noqoto qof kasta.

- Talo ka socota qareenka dhanka socdaalka ka raadso. Qareen dhanka socdaalka ah ka hel [oregonimmigrationresource.org](http://oregonimmigrationresource.org).
- Talo dhanka gargaarada dadweynaha oo ka socota Khadka Adeegyada Gargaarka Sharciga/Xarunta Sharciga Oregon ee Gargaarka Dadweynaha ka raadso **1-800-520-5292**.
- La soco isbeddelada la xiriira Gargaarada Dowladdeed “Public Charge” adiga oo fiirinaya [oregonimmigrationresource.org](http://oregonimmigrationresource.org) iyo [www.protectingimmigrantfamilies.org](http://www.protectingimmigrantfamilies.org).